



dhib majiro is dhibidna majirto, qofka dadka dhiba Ilaahay ayaa dhiba, qofka dadka ku adkeeyana Ilaahay ayaa ku adkeeyo

Abii Saciid Alkhudri Allaha ka raali ahaade wuxuu Rasuulka Ilaahay ka wariyey inuu yiri:
"dhib majiro is dhibidna majirto, qofka dadka dhiba Ilaahay ayaa dhiba, qofka dadka ku
adkeeyana Ilaahay ayaa ku adkeeyo ".

[Xadiis Saxiix ah, marka la eego u Marag kaca kale ee soo arooray] [Waxaa wariyay Ad-aaraqudni]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey inay waajib tahay in qofku ka joojiyo naftiisa iyo dadka kaleba dhibka nooca uu yahayba iyo qaab uu yahayba qofna uma banaana inuu dhibo naftiisa ama cid kale midna. Qofna uma banaana inuu dhib ka hor geeyo dhib kale waayo dhib laguma joojiyo dhib kale, inay qisaas aan lagu xadgudbayn tahay mooyee. Ka dib Nabigu scw wuxuu cadeeyey in loogu goodiyey qofka dadka dhiba in la dhibidoono, oo qofka dadka ku adkeeya lagu adkaydoono.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/4711>

